

Shaqajoojin muddaharaad ah oo degmada Bergen ka dhacaysa – saamaynta ay taasi ku yeelanayso iskoolkannaga

ISKOOLKANNAGU QAYB AHAAN AYUU ARDAYDA KA XIRNAAN DOONAA LAGA BILLAABO 2-DA JUUN.

Iskoolkannagu wuxuu gelayaa shaqajoojin muddaharaad ah laga billaabo arbacada 2-da juun ee 2021-ka.

Taas oo keenaysa in ay waxbarashada badankeedu istaagi doonto.

Waxaa dhici karta in ay iskoollada qaarkood ka jiraan waxbarasho, kormeer [tilsyn] ama SFO – warbixin dheeri ah ka eego bogga internetka ee iskoolka. Iskoolka laftigiisa ayaa toos u sheegaya ardayda qaarka waxbarasho helaysa iyo qaarka aan heli doonin.

Waxaan waalidka ka codsanaynaa in ay la socdaan bogga internetka ee degmada Bergen www.bergen.kommune.no, bogga internetka ee iskoolka iyo/ama saxaafadda si ay ula socdaan warbixintii ugu danbaysay ee shaqajoojinta, sida marka ay shaqajoojintu dhammaato oo kale.

Haddii ay carruur kuu dhigtaan SFO, oo markaasna SFO-gii la xiro:

Waxaan idin xusuusinaynaa in loo baahan yahay in lacagta booska SFO wakhtigeeda lagu baxsho si looga baaqsado in la soo diro warqado digniin ah oo laysku xusuusinayo in lacagtaas la baxsho. Marka ay shaqajoojinta muddaharaadka ah dhammaato, ayaa la tirin doonaa inta maalmood ee aydaan helin SFO caadi ah – lacagaha mustaqbalka la idinka rabo ayaana laga jarayaa wixii aad yeelataan.